



OGAYSIIS MUHIIM AH OO KU SAABSAN CAABUQA KORONAFAYRAS(COVID-19) OO LOOGU TALO GALAY DHAMMAAN QAXOOTIGA IYO MAGANGALYO-DOONKA KU NOOL NAWAAXIGA MAGAALOOYINKA (Lasoo saaray: 19-ka Maayo 2020)

Dowladda Kenya waxay soo saartay Xayyiraad dhanka socdaalka ah si looga hortago faafida cudurka Korona (COVID-19), gaar ahaan:

Bandow qaran inta u dhaxaysa 7:00 fiidnimo illaa 5:00 subaxnimo. Bandowgaan wuxuu socon doonaa hadda illaa 6-da Juun, 2020.

- Ma jiraan wax dhaqdhaqaaq soo galis iyo ka bixitaan intaba **Nawaaxiga Magaalada Nayroobi, Kilifi, Kwale, Mombasa iyo Mandera.** Xannibaadaan waxay jiri doontaa hadda illaa 6-da Juun, 2020.
- Ma jirayaan wax dhaqdhaqaaq ah gudaha ama ka bixitaanka **Islii ee Nayroobi iyo Old Town ee Mombasa.** Xayiraadaan ayaa **hada** dhaqan-galaysa illaa **27-ka Maayo 2020.**
- **Xudduudaha Tanzania iyo Soomaaliya ayaa laga xiray** socdaalka dadka laga billaabo 16-ka Maayo 2020.
- Kama jiraan wax dhaqdhaqaaq ah soo galis iyo ka bixitaan **xeryaha qaxootiga Dadaab iyo Kakuma.**

Tirada kiisaska cudurka Covid-19 ayaa sii kordhaysa, oo waxaa aad muhiim u ah inaad la socoto oo aad u **hoggaansanto tilmaamaha iyo xayiraadaha** Dowlada Kenya si aad uga caawiso ka hortagga faafitaanka. Run ahaantii, tani waxay la micno tahay:

- **Ku maydho gacmaha saabuun iyo biyo si joogta ah.**
- **Fadlan haku warwareegin meelaha si micno darro ah dharaartii.** Haddii ay daruuri tahay inaad baxdo, **xiro maskaraha wajiga** marka aad ku sugan tahay dhammaan **goobaha caamka ah oo wado warqadahaaga diinwaan-gelinta** markasta.
- **Haka qayb galin hana qabanin kulamada dadweynaha.** Haddii ay lagama maarmaan tahay inaad ka qayb gasho kulamada dadwaynaha, sida aaska ama aroosyada, iska hubi in dadka halkaas isugu imaanayya **aanu ka badnayn 15 qof.**
- **Lacalla haddii dowlada ay ka samayso baaritaan caafimaad baaxad leh** goobo kala duduwan si loo xakameeyo faafitaanka cudurka Covid-19, oo adigana joogtid goobahaas, fadlan **wada shaqayn la yeelo shaqaalaha wasaarada caafimaadka.**

Tallaabooyinkaan waxaa loogu talo-galay **badbaadada** waana **dantaada.** Intaasi waxaa sii dheer, waxaa sidoo kale gacan ka gaysan doontaa yareynta faafitaanka cudurka Koronafayres (Covid-19) **Balse fadlan ogow inay jiraan tani ay kugu yeelan karto** haddii aadan u hoggaansamin tilmaamahaan oo ay ku jiraan:

- **Haddii aadan ku xiran maskaraha wajiga goobaha caamka ah, waxaa lagu ganaaxayaa lacag dhan 20,000 Kenya Shilin** amaba wajihi kartaa 6 bilood oo **xarig ah** ama labadaba.
- **Haddii aad ka qayb gasho kulan dadwayne halkaas oo ay isugu imaanayaan in ka badan 15 qof ama aad socotid saacadaha bandowga jiro ama isku daydid inaad u safarto amaba ka soo baxdid xeryaha qaxootiga ku yaalla Kakuma iyo Dadaab, waa lagu xiri karaa;** taa bedelkeeda waxaa dowlada ay kugu **karantiili kartaa** goobo loogu talo galay muddo 14 beri ah adigoo qarshka iska bixinayya.

Wakhtiyadaan Ayaan qofna u sahlamayn. Haddii aad caawimaad u baahato, fadlan eeg **lambarrada gergaarka degdegga ah ee soo socda:**

Diiwaangelinta / warqad-siinta degdegga ah: Xoghaynta Arrimaha Qaxootiga Shauri Moyo: 0772057770	Khadka Caawinta ee UNHCR: 0800720063 (bilaash ah)
Xaaladaha degdegga ee Caafimaad: NCKK 0704873342 / 0723281352/ 0723281362	Arrimaha la xiriira Caymiska NHIF (Sanduuqa Caymiska ee Isbitaalaadka Qaranka): 0740049502
Xaaladaha degdegga ee la xiriirta sharciga (sida xiritaan, dhibaatayn boolis): Kituo cha Sheria 0720806531	Xaaladaha degdegga ee maciishada: Danish Refugee Council 0800720181
Khadka la Talinta: 1190/ 1199/ 0721 336017	Khadka Tooska ah ee Ilaalinta Caruurta: 116

Caabuqa COVID 19 wuxuu si toos ah ku faafaa dhibcaha (qufaca/hindhisada) ka imaanaysa qof qaba cudurka; si aan toos ahayn wuxuu ku fidaa iyada oo la taabto sagxadaha ama walxaha uu isticmaalay qof cudurka qaba. Haddii aad leedahay mid ka mid ah calaamadaha Caabuqa Korona(COVID-19) sida qandho, qufac, neef-tuur iyo neefsashada oo kugu adkaata, fadlan kala xiriir Wasaaradda Caafimaadka halkaan 0800721316 (bilaasha ah); 0732353535; ama 0748592558 si lagu hago.